

# XASUUQII TUULADA BOHOL EE DEGMADA CEELAFWEYN

Marka ugu horreysa waxaan salaan ,hambalyo iyo taageero u soo dirayaa webka Farshaxan.Waa dhallinyaro habeen iyo maalinba u heelan inay baraarujiyaan, isla markaana xusaan, gabood falkii loo geystay dadkan reer Somaliland, iyadoo cadowga Somaliland isku dayayo inuu tirtiro taariikhdii dadkan, iyo dambiyadii laga galayba, waxaan Illaahay idiinka rajeynayaa inuu hawshan idiin fududeeyo, annaguna waxaan idiinla garab taagan nahay hiil iyo hoo aan hagar lahayn, taariikhduna waa idin xusi doontaa mar aan fogayn.

Waxaan jecellahay inaan halkan idiinku soo gudbiyo, xasuuqii **Bohol** oo ka tirsan aagga Ceelafweyn, waxan filayaa inay bilow fiican innoo tahay, wixii kalena waan soo dhammaystiri doonaa, annagoo isku dayayna inaan ka soo qaado, sawiro, iyo waraysiyo maqal iyo muuqaal ah, dadkii ka badbaaday xasuuqyadaa kala duwan, una soo taagnaa markii la dilayey dadkooda. Waxaan hayaa qaar ka mid ah magacyadii dadkii geystay xasuuqa iyo kuwii ka dambeeyey ee abaabulayey, waxaana imminka London jooga nin ugu yaraan 10 qof ku dilay Cerigaabo.

Mahadsanidin.

XASUUQII TUULADA BOHOL

Sida la ogyahay waxaa laga jooga waqti dheer markii xasuuqani dhacay ,waxaanan isku daynay inaan soo ururino intaan heli karno magacyadii dadka lagu xasuuqay BOHOL, waana kuwan soo socda wixii laga xasuustay .Konton bay kor u dhaafeen dadka lagu xasuuqay iyadoo god lagu ururiyey dabadeedna tacshiirada lagu furay ,sidoo kale waxaa ka baxsadey xasuuqani shan nin oo qaar weli nool yihiin .Ilaahay ha u naxariisto dadkaa sida xaq darada ah loo laayey ,ehelkooda iyo inagana samir iyo iimaan Allah ha inaga siiyo Aamiin, Aamiin....

Assalamu calaykum :

### **Magacyada dadkii xasuuqa tuulada Bohol:**

Daahir Cali Muuse (Daahir Godho)

Yuusuf Faarax Halac (Yuusuf Banbaane)

Muuse Ismaaciil Cashuur

Ciise Ismaaciil Cashuur

Idiris Aadan Ducaale

Cabdi Aadan Cartan

Milikh Aadan Warsame

Maxamed Ibraahim Xirsi (Wanbe)

Maxamud Aw Ibrahim Ducaale

Cabdulahi Warsame Seed

Guuled Maxamud Diiriye

Saalax Jawte

Cadib Cabdi Sed

Aadan Ducaale Cali (Aadan Dheere)

Maxamed Bare Cali Hurun

Ina Ibrahim Oogle

Ina Ducaale Xasan  
Axmed Cashur  
Axmed Xasan Goox  
Cabdi Nuur Cali Daahi  
Cabdi Ducaale Cali  
Aadan Ducaale Cali  
Aadan Maxamed Cali  
Aw Salax Yusuf Cabsiye  
Aw Raahin Ducaale Cali Looge  
Aw Xusen Indhoole iyo iyo nin yar oo waday odayga ina dhaha la'  
Cabdi Xasan Ciige  
Laba ilma Jaamac Cabdule ah

## MAHAD GAAR AH:

Waxaan mahad gaar ah u ah u soo jeedinayaa, dhammaan dadkii ka qayb qaatay ururinta magacyada dadkii lagu xasuuqay Somaliland iskuna hawla, gaar ahaan kuwan gobolka Sanaag oo kala ah:

Abdi Hassan Cabsiye – Weriyaaha Haatuf ee gobolka Sanaag, oo isagu aad isugu hawlay, inuu helo dhammaan magacyada dadkaasi xasuuqa foosha xun loo geystay, isla markaana Abdi Hassan Cabsiye, waxaan mar kale u soo diraynaa isaga inta kale oo ehelkooda lagu xasuuqay Cerigabo iyo Ceelafweyn ( waxaa ku jiray dadkii Cerigabo lagu dilay walalkii Faysal Hassan Cabsiye, ahaana arday 18 jir ah) waxaan leenahay Abdi halkaa ka wad halganka illaa maxkamad la keeno, dambiilayaashii dhagar-

qabayaashii, baabi'iyey qoysas badan rajadoodii mustaqbalka iyo nolol caadi ah inay ku noolaadeen.

Waxaan kale oo u mahadnaqaynaa **Naaleeye Aadan**, oo soo diaries Xasuuqii ka dhacay BOHOL, deganna dalka Canada ee North America.

Waxaan kale oo u mahadnaqaynaa Website yada kala ah: Farshaxan, SomalilandCenter, Halgannews, oo soo daabacay, iskuna mashquuliyey inay helaan wararka xasuuqyadii ka dhacay Somaliland.

Well done you all

**CODSI:** Waxaan ka codsanaynaa cid kasta oo wax ku kordhin karta magacyada dadkii lagu xasuuqay gobolka Sanaag meelo kala duwan oo ka mid ah sida: **Cerigabo, Ceelafweyn, Bohol, Dararweyne, Xamilka, Bohol, Kalshiikh**, iyo dhammaan dhulka miyiga iyo Ceelashaba, inay la soo xidhiidhaan website ka farshaxan.com

Mahadsanidin

Mustafa Salah

London

UK